Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Waxaanu sida ugu dhakhsaha badan turjumaadaha farrriintani oo ku qoran Русский, Soomaali, Español, 简体中文, Tiếng Việt u soo gelin doonaa https://go.usa.gov/xtBQC.

Sibtambar 8, 2022

Ku socota: Hay'adaha maamulka kiiska, daryeel bixiyayaasha iyo shaqaalaha ODDS
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Koronto la'aan imaan karta oo loogu talagalay ka hortagga dabka

Waaxda Adeega Cimilada Qaranka ayaa soo saartay digniinta halis sare oo ku aadan inta badan Oregon laga bilaabo 11 subaxnimo. Jimcaha ilaa 11 habeenimo. Sabtida. Saadaasha waxaa ku jira dabaylo xoogan, qoyaan hoose iyo heerkul sare. Xaaladahani aadka u daran waa kuwo ku habboon dabka kaymaha.

Si loo ilaaliyo dadweynaha, shirkadaha korontada ee Oregon ayay dhici kartaa in ay bilaabaan xiritaanka 'shutoffs' korontada ee ammaanka dadweynaha (PSPS). Tallaabooyinkani waxay ka hortagayaan hababka korontadu in ay huriyaan dabka kaymaha inta lagu jiro waqtiyada khatarta sare leh.

Haddii PSPS ay dhacdo, dadka qaarkood koronto ma yeelan doonaan. Waa suurtagal ah in qaarkood korontada lumiyaan muddo ilaa 48 saacadood ah. Kuwa korontada ugu tiirsan qalabka caafimaadka ama sababo kale ahaan waxay u baahan yihiin in ay qaadaan tallaabooyin ay ku xaqiijinayaan badbaadooda.

U diyaar garow
ODDS, hawl-wadaagayaasheena iyo daryeel bixiyayaasheena waxaa saaran mas'uuliyad ay ku xaqiiyaan badbaadada dadka aanu taageerno. Waxaanu rabnaa inaan xaqiijino in aad diyaar tahay oo aad qorshe leedahay.

Fadlan dib u eeg qorshayaashaada xaalada degdega ah oo dhaqaaji/hawl geli iyaga haddii xiritaanka 'shutoff" korontada ee ammaanka dadweynaha uu yahay mid suurtagal ka ah degaankaaga. Fadlan la xiriir dadka, qoysaska iyo daryeel bixiyayaasha si loo xaqiijiyo in ay qorshe leeyihiin, sidoo kale.

Halkan waxaa ku qoran su'aalaha qaarkood iyo waxyaabo si loo diyaar garoobo:

- Waa maxay qorshahaaga iyo qorshahaaga beddelka ah ee loogu talagalay kuwa u baahan awood koronto oo loogu talagalay daryeelkooda caafimaad iyo jireed?
- Miyay dadka ku jira daryeelkaaga iyo shaqaalahaagu joogi karaan laba maalmood oo koronto la'aan ah?
- Haddii qof hoos yimaada daryeelkaagu ku tiirsan yahay koronto si uu ugu daaro qalab nolosha joogteynaya ama qaato daawo u baahan qaboojiye, waa maxay qorshahaagu si aad u xaqiijiso helitaankiisa korontada?
- Haddii qof ama shaqaale hoos yimaada daryeelkaagu uu halis ugu sugnaan doono soo gaarista kulaylka marka ay korontadu tagto, waa maxay qorshahaaga aad kaga ilaalinayso kulaylku?
- Waa maxay goobta beddelka ah, sida xarumaha la isku qaboojiyo, ee aad u isticmaali karto si aad u ilaaliso kuwa ku jira daryeelkaaga?

Halka laga heli karo macluumaad

Shirkadaha korontada ayaa macluumaad soo gelinaya website-yadooda waxaana dhici karta in ay digniino siiyaan macaamiisha loo qorsheeyay PSPS. Fadlan talo ka raadso website-ka shirkadaada wixii la xiriira macluumaadkii u dambeeyay. Halkan waxaa ku qoran dhowr ka mid ah website-yada shirkadaha:

- Pacific Power
- Portland General Electric (PGE)
- Consumer Power, Inc.

Waxaad sidoo kale isku diiwaan gelin kartaa ogeysiisyada xaalada degdega ah oo ka socda nidaamyada digniinta ee degaanka oo la adeegsanayo OR-Alert oo laga helayo https://oralert.gov. Haddii aad rabto in aad ilahani la wadaagto dadka ku hadla Isbaanishka ka hor inta aan la soo dhejin turjumaadaha farriintani, fadlan isticmaal qoraalkani, "Regístrese para recibir notificaciones de emergencia: https://oralert.gov."

La xiriir xafiiskaaga degaanka ee xaalada degdega ah — heer degmo ama degaan — si aad u ogaato in ay hayaan digniino.

Raadso taageero

Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon Xafiiskeeda Maamulka Wax u adkeysiga iyo Xaalada Degdega ah (OREM) wuxuu Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) kala shaqeynayaa qiimeynta khatarta ay u leedahay dadka u baahan korontada.

OREM iyo ODHS waxay sameynayaan qiimeynta khatarta ee dadka reer Oregon ee hela taageerooyinkayaga si loo go'aamiyo in dadku haystaan waxay u baahan yihiin si ay u noqdaan kuwo ammaan ah muddo 24 ilaa 48 saacadood.

Haddii aad u baahan tahay taageero, macluumaad iyo ilo: Wac 211. Waxay kugu xiri doonaan OREM haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah.

Waanu fahamsanahay sida ay walwalka ugu keeni karto adiga, shaqaalahaaga iyo kuwa aad taageerto. Marxaladaha hore ee xaaladaha degdega ah waxaa qayb ka ah isbeddelka macluumaadka iyo isbeddelka mudnaanta jirta si loo daboolo baahiyaha cusub ee la ogaado. Waa muhiim in la filo macluumaad cusub iyo tilmaamo hadba sida xaaladu isku beddesho. Wax wanaagsan ayaan rajeynaynaa waxaanan isku diyaarinaynaa suurtagalnimada waxa dhici kara.

Fadlan, isku day intii karaankaaga ah in aad ku sugnaato badbaado iyo rajo wanaagsan.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.